

## **DAAWAYNTA INFEEKSHANKA MRSA**

Daawaynta waxay qaadata 5-10 maalmood.

- 2-3 jeer maalintii waa in labada dalool ee sanka marisa bomaatada Bactroban.
- Maalin kasta daawada Hibiscrub ku dhaq jirka oo idil, xitaa timahaaga. Ha ilowin in aad dhaqdo faraha gacmaha iyo lugaha dhexdooda. «Saabbuun» marso laba jeer oo isku xigta.
- Isku qalaji shukumaano nadiif ah.
- Haddii MRSA dhuunta laga helo, ku luqluqo daawada afka Korsodyl ugu yaraan laba jeer maalin kasta.
- Iska beddel dharka, firaashyada sariirta iyo shukumaanayaasha maalin kasta kaddib ku dhaq shukumaanayaasha, firaashyada sariirta iyo dharka 60 darajo.
- Ha ku isticmaalin kareem qoyaan ee caadiga ah – maxaa yeelay waxay ciribtirayaan maadooyinka daawada aad isku daawaynayso. Haddii jirka u ku qalalo waxaad farmashiyada ka soo iibsan karta kareemo nooc gaar ah oo aad isticmaali karto.

Boomatada, saabun iyo biyaha afka caadi ahaan waa lacag la'aan.

## **DAAWAYNTA KADDIB**

Daawaynta kaddib waxaa hal, laba iyo saddex toddobaad kaddib la hubsan doonaa in jeermiyadii/bakteeriyyadii ay ciribtirmeen. Shaybaarka waxaa loogu dhaqaaqa sida markii ugu horeeysay oo kale, iyadoo qori yar oo suuf leh sanka, qoorta iyo gumaarka la geliyo. Tan kale, waxaa lagula talinaya inaad shaybaar laga qaado 3, 6 iyo 12 kaddib.

Mararka qaarkood waxaa dhici karto in sida loo ciribtiro jeermiga/bakteeriga awgeed lagu celceliyo daawaynta dhawr jeer.